



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI LR. 10
OGGOLAANSHAHA ANSIXINTA SHARCIGA SHAQO-QORISTA SHAQAALAHA SHISHEEYE

TAARIKH: 09/12/2015

MADAXWEYNAHA J.F.S,

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Xarafka ' C ' ee Dastuurka KMG.

Markuu Arkay : Qodobka 90aad, Xarafka ' F ' ee Dastuurka KMG

Markuu Arkay: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Ref: 865/3/1/9/15 ee 31/08/2015 kuna saabsan Ansaxinta Golaha Shacabka ee Sharciga Shaqo qorista Shaqaalaha shisheeyaha

Markuu Tixgeliyay: Baahida loo qabo in uu dalka kajiro Sharciga Shaqo qorista Shaqaalaha shisheeyaha

WUXUU SOO SAARAY XEERKAAN:


Qodobka 1aad

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliyeed Saxiixo Xeerkaan, Madaxwaynuhu waxa uu oggolaaday Sharciga Shaqo qorista Shaqaalaha shisheeyaha

Qodobka 2aad.

Xeerkan waxa uu dhaqangelayaa maalinta uu Madaxwaynuhu Saxiixo waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 09/12/2015



Madaxweynaha J.F.S
Mudane Xasan Sheekh Maxamuud



Ref: 865/3/1/9/15:الرقم

Mogadishu, 31st August 2015 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada
L/H. Golaha Shacabka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

Ujeedo: Ansixinta Sharciga Shaqo Qorista Shaqaalaha Shisheeye


M.ne Madaxweyne;

Waxaan kuugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Shaqo Qorista Shaqaalaha Shisheeye oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 6aad ee fadhigiisii 37aad taariikhda markay aheyd 31^{ka} Agoosto 2015 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 139 (Boqol Soddon iyo Sagaal Xildhibaan).
- Xildhibaan diidey: 0
- Xildhibaan ka aamustay 1 (Hal Xildhibaan).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.


M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka




MJ/AM

**ANSIXINTA SHARCIGA SHAQO QORISTA SHAQAALAHA
SHISHEEYE**

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS


Tirada Xubnaha Codeysay 140: Oggol (139) Diidmo (0) ka aamustay (1)



Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Taariikh: 31st August 2015

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS



Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur likar

Taariikh: 31st August 2015

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS

Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: 31st August 2015





GUDDIGA ARIMAHA BULSHADA

Ku: Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS

Mudane Guddoomiye,

Waxaan halkaan kuugu soo gudbinayaa Hindise sharciyeedka Shaqaalaha

Shisheeye ee lagu dhaqi doono Shaqaalaha Ajnabiga ah oo ay Wassaaradu u soo

gudbisay Golaha Shacabka sida ku cad Qodobka 63aad ee Dastuurka iyo

Qodobka 46aad, 47aad, 48aad iyo 49aad ee Xeerhoosaadka Baarlamaanka, si uu u


maro Akhrinta Labaad ee Golaha hortiisa.

Mahadsanid.

Mudane :Xildhibaan Axmed Aabe Aden

Guddoomiye ku Xigeenka Guddiga Arimaha Bulshada.

Handwritten signature
24/08/15





Ref: GSH/ 309 / 05 / 15

Date: 18 / 05 / 2015

Ku: Dhamaan Xildhibaanada Baarlamaanka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka

Ujeedo: Soo Gudbin Hindise Sharciyeedyada.

Mudanayaaal,

Waxaan Si Xushmad Iyo Qadarin leh Idinkugu Soo gudbinayaa **Hindise Sharciyeedyada** hoos Ku Qoran Iyadoo Ay Soo gaareen Golaha Shacabka Taariikhdu Markay aheyd 16/05/2015

1. Hindise Sharciyeedka La Dagaalanka Argagixisada
2. Hindise Sharciyeedka Sharciga Shaqaalaha Ajnabiga

Sidaa Awgeed, Waxaan Ku rajo weynahay inaad waajibaadkiina dastuuriga ah ka Gudataan.

Mahadsanidiin

M. ne Muxammad Sh. Cusmaan " Jawaari "

Guddoomiyaha Golaha shacabka





Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka

=Muqdisho=

Ujeedo:- Soo gudbin Hindise Sharciyeedka Shaqaalaha Ajnabiga ah

Mudane Guddomie:

Iyadoo aan ka ambaqaadeyno go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.09.04.15 ee 23/04/2015, kuna saabsanaa ansixinta Hindise-sharciyeedka shaqaalaha Ajanabiga ah, oo uu goluhu cod buuxo ku ansixiyey.

Sidaa darted, Mudane Guddomiye, waxaan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa Hindise-sharciyeedka Shaqaalaha Ajnabiga ah, si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah. Waxaan idin kaga codsaneynaa in aad fududeysaan ansixinta hindise sharciyeedkan maadaama baahi wen loo qabo dhaqan-gelintiisa.

Wada Shaqayn Wacan.

Mudane Cumar Cabdirashiid Cali Sharmaarke
Ra'iisul Wasaaraha JFS



Federal Government of Somali Republic
Ministry of Labor and Social Affairs
Office of the Minister

Ref: WSHAB/MOLSA/02/ 006/2015

Date: 07.04/2015.

Ku: Ra'isul wasaaraha dowladda faderalka Soomaaliya

Ujeedo: soo gudbin Hindisa Sharciyeed

Mudane ra'iisul wasaare:

Wasaaradda shaqada iyo arrimaha bulshada iyada oo ka anba qaadaysa himilada wasaaradda iyo qorsha howleedka xukuumaddu horay u go'aamisay waxay halkan idinku soo gudbinayaan Hindisa sharciyeed ku saabsan shaqaalaha ajaanibta ah. Ee ka shaqeeya dalka soomaaliya.

Hadaba wasaaradda waxay si qadarin leh xukuumada uga codsanaysaa in lameel mariyo hindiso sharciyeedka halkaan ku lifaaqan.

Wadashaqeyn wacan

Xil: Cusmaan libaax Ibraahim
Ku simaha wasiirka wasaaradda
ahna wasiir ku xigeenka



Contact

Tell +252-616 485 802

Email: Ministry@mol.gov.so/Abdiweli.muudey@gmail.com



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

**SHARCIGA SHAQO-QORISTA SHAQAALAHA
SHISHEEYE**

Qodobka 1aad:

Eray-Bixin

Shisheeye: waxaa loola jeedaa qof aan ahayn muwaadin Soomaaliyeed.

Ruqsad: waxaa loola jeedaa “Ruqsadda Shaqo ee la siiyo shaqaalaha shisheeyaha ah”.

Haysta Ruqsadda Shaqada: waxaa loola jeedaa qofka shisheeyaha ah ee la siiyey ruqsadda shaqada.

Guddi: waxaa loola jeedaa Guddiga Qiimaynta Codsiga Ruqsadda Shaqo.

Agaasimaha Guud: waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshadda.

Wasiirka: “Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada”

Wasaarada: Waxaa loola jeedaa “Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshadda”

Qodobka 2aad:

Saameynta Sharcigan

Sharcigani ma saameeyo:

1. Xubnaha Ergooyinka Dبلوماasi ahaan ku jooga dalka JFS.
2. Xubnaha Ergooyinka Qunsuliyadaha.

Qaxootiga iyo dadka magangelya-doonka ama magangelyada ku jooga Dalka ee lagu dhaqo heshiisyada caalamiga ah.

Qodobka 3aad:

Shuruudaha iyo Shaqooyinka ka Reeban

B. Shaqooyinka ka reeban shisheeyaha waxaa lagu qeexi doonaa Xeer gaar ah oo wasiirku soo saaro.

T. Iyada oo la raacayo Sharciga Socdaalka, qofka Ajnabiga ah wuxuu Dalka JFS, ka hawlgeli karaa, Marka uu helo Ruqsad Shaqo oo ay bixisey Wasaaradda, si sharci ah ku soo galo dalka, haystana “Ruqsad joogitaan ama deganaasho, marka laga reebo Dadka ku soo galay “Qaxootinnimo”.

J. Wasaaraddu ma siin karto qof Ajnabi ah ruqsad shaqo ee uu qaban karo Qof muwaadin soomaali ah;

X. Iyada oo loo hoggaansamayo Sharciga Socdaalka, qof kasata oo doonaya inuu qorto Shaqaale Shisheeye ah wuxuu codsi qoraal ah u soo gudbinayaa Wasaaradda, Isaga oo u hadlaya Qofka Ajnabiga ah ee shaqaalaha ah.

Kh. Wasaaradda waxay Shaqaalaha Shisheeye ee shaqo doonka ah siin kartaa Ruqsad shaqo, kadib marka uu Dalka si sharci ah ku soo galaan, buuxiyaana dhammaan shuruudaha sharcigu farayo.

D. Shaqaalaha Ajnabiga ee gudaha laga qoro iyo kan muwaadinka soomaaliga ah ee ay isku aqoonta iyo waayo aragnimada leeyihiin waa in ay sinaadaan xagga mushaarka iyo wixii xuquuqa ah oo kale.

Qodobka 4aad:

Shuruudo dheeraad ah

Wasaaraddu marka ay bixinayso Ruqsadda shaqada, waxay raacin kartaa in uu qofkaas buuxiyo shuruudo cayiman oo lagama maarmaan ah.

Qodobka 5aad:

Dalabka Ruqsadda Xagga Maal-gashiga

B. Shaqaalaha Ajnabiga ee soo gelitaanka Dalka loogu oggolaaday sida uu dhigayo sharciga dhiirrigelinta Maalgelinta shisheeye, wuxuu “ Ruqsadda Shaqada” weydiisanayaa Wasaaradda 30 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta uu soo galay Dalka.

T. Inta lagu guda-jiro habraaca bixinta “Ruqsadda Shaqada”, qofkaas ajnabiga ah, ee soo gelitaankiisu la xiriiro maal-gelinta shisheeye waxaa loo oggol yahay inuu sii hawl-galo.

Qodobka 6aad:

Degganaanshaha iyo Dal-ku-galka

Shaqaalaha Ajnabiga ee si rasmi ah u weydiisanaya ama loo-shaqeeyuhu u weydiinayo “Ruqsadda shaqada” waa inuu:

B. Haystaa degaanaansho, dal-ku-gal shaqo ama si ku-meel-gaar ah loo siiyey dal-ku-galka, si waafaqasan Sharciga Socdaalka JF ee Soomaaliya ee aanu dalka ku soo gelin qaabab kale, sida dalxiisi ama dal-ku-gal maritaan (transit visa).

T. Aanu noqon qof hore loogu diiday soo-gelitaanka Dalka JF ee Soomaaliya

Qodobka 7aad:

Shaqooyin si Gaar ahaaneed loo Fasaxay

Ajaanibta soo socota waxay Dalka ka qaban karaan shaqooyin uu Wasiirku si gaar ah ugu fasaxay:

B. Dadka la masaafurinayo, inta ay ku suganyihiin goobaha ku meel gaarka ee lagu siihaynayo.

T. Ajaanibta dalka sharci-darro ku soo galay ee sugaya masaafurin.

J. Kuwa Dalka ku dhashay laakiin aan qaadan jinsiyadda soomaalinimada marka la eego Sharciga Jinsiyadda ee Soomaaliya.

X. Ajaanibta/Shisheeyaha ee lagala noqday Jinsiyadda.

Qodobka 8aad:

Muddada Ansaxnimada Ruqsooyinka Shaqada

Ruqsooyinka shaqada ee lagu bixiyo sharcigan waxay ansax ahaanayaan muddo hal sano ah oo ka bilaabata taariikhda la soo saaray ruqsadda shaqo. Waxaa taas ka baxsan "Ruqsadda shaqo" ee la siiyey qofka ajnabiga ah, ee si ku-meel-gaar ah loogu oggolaaday soo-gelitaanka Dalka, si waafaqsan Sharciga Socdaalka, waxay ansax tahay muddada oggolaanshihi ku-meel-gaarka ahaa, laga bilaabo taariikhda la soo saaray.

Qodobka 9aad:

Dheeraynta Muddada Shaqada

B. Haddii qof haysta Ruqsad shaqo lagu bixiyey si waafaqsan sharcigan, loo dheereeyo muddada shaqada iyada oo la raacayo Shuruudaha, Ruqsad-haystuhu wuxuu wargelinayaa Xafiiska Diiwaan-hayaha Wasaaradda oo muddo dheerayntaas ku dul qoraya Ruqsadda, Shaabada rasmiga ahna dulsaaraya.

T. Mudda dheerayntu waa ineysan ka badnaan markiiba sedex (3) Bilood taas oo naqoneysa mid ku xiran baahida Shaqada ee jirta.

J. Haddii qofka Ajnabiga ahi Dal ku-Galka ka dhaco, looma cusboonaysiin karo ilaa wasaaradda la ogaysiiyo.

Qodobka 10aad:

Cusboonaysiinta Ruqsadda Shaqo

Inta aysan dhicin Ruqsadda Shaqada, haddii Ruqsadluhu doonayo inuu shaqada sii-wato, waa inuu weydiisto Wasaaradda in loo cusboonaysiiyo. Marka ay jirto xaaladdan, weydiistaha/codsadaha cusboonaysiinta ruqsadda wuu sii-wadan karaa shaqadiisa ilaa Wasaaraddu ka soo saarto diidmo ama ogolaansho cusboonaysiin Ruqso, iyadoo cusboonaysiin kasta muddada ay ansaxa tahay ay noqonayso hal Sano.

Qodobka 11aad:

Diidmada Bixinta ama Cusboonaysiinta Ruqsadda

B. Haddii la diido bixinta ama cusboonaysiinta Ruqsadda Shaqada, weydiistuhu/codsaduhu wuxuu xaq u leeyahay cabasho Racfaan in uu u qorto Wasiirka, muddo 30 maalmood ah gudahood oo ka bilaabata Taariikhda uu ogaado amarka diidmada.

T. Cabashadaas, marka ay gaarto Xafiiska Wasiirka, waxaa loo gudbinayaa Guddiga Qiimaynta shaqaalaha Ajnabiga ah, oo arrinta talo ka siinaya Wasiirka, muddo 15

maalmood gudahood, Wasiirkuna wuxuu go'aan kaga gaarayaa mudo 30 Maalmood gudahood.

J. Go'aanka ama Amarka diidmada Wasiirka waxaa cabasho looga qaadan karaa Maxkamadda Sare ee JF ee Soomaaliya oo leh Awoodda dhegaysiga dacwadaha madeniga ah.

Qodobka 12aad:

Habka Haysashada Ruqsadda

Sitaha "Ruqsadda SHaqada" waa inuu Ruqsadda isagu haystaa ama ay u taallo goobta Shaqada si uu u tuso Saraakiisha ku Shaqada leh, marka loo baahdo.

Qodobka 13aad:

Googo'ida Ama Lumidda Ruqsadda

B. Haddii "Ruqsaddu googo'do ama lunto, Ruqsadluhu waa inuu Wasaaradda weydiisto si loogu beddelo, 15 (Shan iyo Toban) maalmood gudahooda, oo ka bilaabata Taariikhda uu ogaaday in ay Ruqsaddu Googo'ddey Ama luntay.

T. Haddii Ruqsadda shaqadu ay lunto, waa inuu Ruqsadluhu ku qoraa Jaraa'idka Dalka midkood lumidda Ruqsadiisa shaqada kuna wargeliyaa Saldhiga Booliska ee degmadiisa, ka dibna u soo gudbiyaa Qoraalada Talaabooyinkaas Wasaaradda muddada ku xusan faqrada (B) ee qodobkaan.

Qodobka 14aad:

Ka-tegidda Shaqada ku Cayiman Ruqsadda

Haddii qofka Ajnabiga ahi ka tago shaqadii ruqsadda ku cayinnayd, waa inuu ruqsadda u celiyo Xafiiska Wasaaradda u qaabilsan, 7 (todoba) maalmood gudahood, ee ka bilaabata taariikhda shaqa-ka-tegista (istiqaalada), arrintaas meelmarinteeda waxaa u xilsaaran loo shaqeeyaha (Hay'ad/Shirkad).

Qodobka 15aad:

Gelitaanka Shaqo ka duwan tan ku cayiman "Ruqsadda"

Sitaha Ruqsaddu ma qaban karo shaqo ka duwan tan ku cayiman "Ruqsadda", mana beddeli karo goobta shaqada ee ku cayiman Ruqsadda, haddii aan fasax laga haysan Xafiiska Wasaaradda ee ku shaqada leh

Qodobka 16aad:

Qoridda Ajnabi aan haysan "Ruqsad Shaqo"

Looma dhiibi karo shaqo qof ajnabi ah oo aan haysan Ruqsad shaqo, sidoo kale looma dhiibi karo shaqo ka duwan tan ku cayiman ruqsadda shaqada uu haysto.

Qodobka 17aad:

Qorista, Beddelka iyo/ama is-casilidda Shaqaale Ajnabiga ah

Cid kasta, ee shaqo u qorata Qof Ajnabi ah, ama Shaqaale Ajnabi ah u beddesha ama ka hawlgelisa meel ka duwan meesha ku cayiman “Ruqsadda” uu haysto, ama haya Ajnabi shaqada iska-casilaya, waa inuu wargeliyo Xafiiska agaasinka Guud ee Wasaaradda, 15(shan iyo toban) maalmood gudahood oo ka bilaabata Taariikhda qorista, beddelka ama iscasilaadda.

Qodobka 18aad:

Guddiga Qiimaynta Shaqaalaha Ajnabiga ah

B. Waxaa la dhisayaa Guddi qiimeeya shaqaalaha Ajaanibta ee uu xubnihiisa magacaabo Wasiirka Wasaaradda, Guddigaas waxaa loogu magac-daray “Guddiga Qiimaynta Shaqaalaha Ajaanibta”;

T. Guddigu wuxuu ka koobnaanayaa xubnaha soo socda:

1. Xubin uu soo magacaabo Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshadda.
2. Xubin uu soo magacaabo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.
3. Xubin uu soo magacaabo Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha.

J. Guddiga ayaa degsanaya nidaam-howleedkiisa gaar ahaaneed.

X. Xubnaha guddiga waxay xilka haynayaan 2 (labo) sano dibna waa loo magacaabi karaa xilli kales.

Kh. Guddiga waxaa hogaaminaya Xubin ka tirsan Wasaaradda.

Qodobka 19aad:

Xil waayida Xubinnimada Guddiga Qiimaynta Shaqaalaha Ajnabiga ah

B. Xubnaha Guddiga, dhammaadka muddada xilka ka sokow, waxay xafiiska bannaynayaan haddii sababaha soo socda awgood ku yimaadaan:

1. Geeri.
2. Is-casilaad.
3. Xil gudasha la'aan.
4. Ama in lagu cadeeyo Danbi shaqada lagu waayi karo.
5. Xil-ka-qadis Wasiirku ku sameeyo.

T. Guddigu waxuu diyaarinayaa warbixin 3 (Seddax) Biloodle ah, isaga oo u gudbinaya Wasiirka Wasaaradda oo la wadaagaya xafiisyada ay khuseyso warbixinta.

Qodobka 20aad:

Guddi-Hoosaad

Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu ka codsado wasiirka wassaarada magacaabista guddi-hoosaad fuliya hawl ama arrin ku jirta waajibaadka Guddiga loo idmaday, Guddi

hoosaadkaas oo la shaqayn doona Xog.Haynta Guddiga Qiimeynta Shaqaalaha Ajnabiga ah.

Qodobka 21aad:

Awoodda Agaasimaha Guud ee Wasaaradda

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, isaga oo hawlgelinaya waaxda shaqada islamarkaana gudanaya waajibaadka ku xusan Sharcigan, wuxuu awood u leeyahay:

1. Inuu soo saaro xog-waraysi qoraal ah ama qof kasta ugu baaqo inuu soo bandhigo macluumaad ku saabsan shaqaale Ajnabi ah, isla markaana ka dalbo inuu keeno wixii qoraal iyo caddayn ee uu hayo.
2. Galo goob kasta, xilli la'aaminsanyahay inuu yahay xilli shaqo ka socoto, loogana shakisan yahay in qof ajnabi ah uu ka shaqaynayo Goobtaas si loo xaqiijiyo dhowritaanka iyo u-hoggaansanaanta Sharcigan.

Agaasimaha Guud oo hawlgelinaya waaxda shaqada ee Wasaarada wuxuu kaloo awood u leeyahay inuu baaro ama ka dalba qofka mas'uulka ka ah ama xiriirka la leh goobta la baarayo macluumaad Milkiilaha ama qofka deggan hoygaas ama qofka mas'uul ka ah waxaa waajib ku ah inuu fududeeyo hawlahaas baaritaanka ah.

Qodobka 22aad:

Baarayaasha Xafiiska Shaqada Degmooyinka

Baarayaasha Xafiiska Shaqada degmooyinka waa in ay haystaan oo sitaan warqado aqoonsi, marka ay gudanayaan xilkooda waa inay warqadahooda aqoonsiga tusaan dadka ay hawlahoodu la xariiraan, sida uu qabo qodobka 110 Xeerka shaqada (Labour Code) Lambar 65 ee 18/10/1972.

Qodobka 23aad:

Xad-gudubka Shaqaalaha Ajaanibta ah

B. Ajnabiga shaqo-gala isaga oo ku xad-gudubaya Sharcigan wuxuu mutaysanayaa ciqaab xarig ah oo aan ka badnayn 2 sano ama ganaax aan ka yareyn 5,000 (shan kun) Doollarka Maraykanka ama Shillin Soomaali u dhigma, iyada oo laga duulayo markasta heerka shaqada ee shaqaalaha Ajnabiga hayo, ka dibna waxaa loo gudbinayaa waaxda Socdaalka.

T. In wixii Lacaga oo sharcigaan la xariira lagu shubo khasnadda Dhexe Dawlada.

Qodobka 24aad:

Xad-gubka loo-shaqeeyayaasha

Cid kasta, ee qorata shaqaale Ajnabi ah ee aan haysan "Ruqsad Shaqo", waxay mutaysanaysaa ciqaab ganaax ah ee u dhexeeya \$5,000 (Shan kun) ilaa \$10,000 (Toban kun) oo Doollarka Maraykanka ama lacag- Shilin Soomaali u dhiganta.

Qodobka 25aad:

Shaqaalaha Ajnabiga ah ee la qoray Sharcigan ka hor

B. Loo-shaqeeye kasta, ee dhaqan-galka Sharcigan ka hor qortay, una shaqeeyaan shaqaale ajaanib ah, waa inuu Wasaaradda u gudbiyaa macluumaad tifaftiran ee la xiriira shaqaalahaas, kana diiwaan-geliyaa.

T. Waxaa kale oo Loo-shaqeeyayaasha la farayaa inay shaqaalahaas Ajnabiga ay u dalbaan “Ruqsad shaqo” si waafaqsan Habraaca Sharcigan.

Qodobka 26aad:

Xeer-nidaamiyaha Sharcigan

Wasiirka Wasaaradda wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro xeer nidaamiye lagu fulinayo Sharcigan.

Qodobka 27aad:

Shuruucdi hore

Wixii sharcigaan laga waayo waxaa loogu noqonayaa shuruucdi hore ee Shaqaalaha Ajnabiga ah.

Qodobka 28aad:

Dhaqan-gal

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu Barlamaanka Federalka Soomaaliya ansixiyo, saxiixana Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya.

Tusmo

Qodobka 1aad: Eray-Bixin.....	2
Qodobka 2aad: Saameynta Sharcigan	2
Qodobka 3aad: Shuruudaha iyo Shaqooyinka ka Reeban	2
Qodobka 4aad: Shuruudo dheeraad ah.....	3
Qodobka 5aad: Dalabka Ruqsadda Xagga Maal-gashiga.....	3
Qodobka 6aad: Degganaanshaha iyo Dal-ku-galka	3
Qodobka 7aad: Shaqooyin si Gaar ahaaneed loo Fasaxay	3
Qodobka 8aad: Muddada Ansaxnimada Ruqsooyinka Shaqada	4
Qodobka 9aad: Dheeraynta Muddada Shaqada	4
Qodobka 10aad: Cusboonaysiinta Ruqsadda Shaqo	4
Qodobka 11aad: Diidmada Bixinta ama Cusboonaysiinta Ruqsadda	4
Qodobka 12aad: Habka Haysashada Ruqsadda	5
Qodobka 13aad: Googo,ida Ama Lumida Ruqsadda	5
Qodobka 14aad: Ka-tegidda Shaqada ku Cayiman Ruqsadda	5
Qodobka 15aad: Gelitaanka Shaqo ka duwan tan ku cayiman "Ruqsadda"	5
Qodobka 16aad: Qoridda Ajnabi aan haysan "Ruqsad Shaqo"	5
Qodobka 17aad: Qorista, Beddelka iyo/ama is-casilidda Shaqaale Ajnabiga ah.....	6
Qodobka 18aad: Guddiga Qiimaynta Shaqaalaha Ajnabiga ah	6
Qodobka 19aad: Xil waayida Xubinnimada Guddiga Qiimaynta Shaqaalaha	6
Qodobka 20aad: Guddi-Hoosaad	6
Qodobka 21aad: Awoodda Agaasimaha Guud ee Wasaaradda	7
Qodobka 22aad: Baarayaasha Xafiiska Shaqada Degmooyinka	7
Qodobka 23aad: Xad-gudubka Shaqaalaha Ajaanibta ah.....	7
Qodobka 24aad: Xad-gubka loo-shaqeeyayaasha	7
Qodobka 25aad: Shaqaalaha Ajnabiga ah ee la qoray Sharcigan ka hor	8
Qodobka 26aad: Xeer-nidaamiyaha Sharcigan	8
Qodobka 27aad: Shuruucdi hore.....	8
Qodobka 28aad: Dhaqan-gal.....	8